

Waxbadan ayaad Adigu sayn kartaa sidii loo dhimilaha kharashyada tamarka guriga oo aad weliba koontorool wanaagsana ku samayn kartaa isticmaalka tamartaada. Tijaabi warbixintan tamarta si aad u yaraysa culayska cimilada iyo tan bay'addaba si ay isla markaana lacag dheeraad ahi kuugu soo noqoto!

1. Kulayl

- Yaree heerkulka guriga hal derejo ama hal digrii oo hoos u dhig kharashyadaas ilaa boqolkiiba shan.
- Ka fogee alaabta guriga ama saabaanta qalabka wax diiriya hortooda, markaas ayuu kulaylku qolka si fiican u gaaraya.

2. Biyaha kulul

- Qobayso wax yar maalin kasta – yaree laga bilaabo 10 daqiiqadood ilaa iyo 5 waxaad markaa kaydin kartaa qiyaastii 800 kWh sannadkii.
- Ku baddel qasabadaha biyo dhowra marka biyo raaciska la samaynayo iyo qasabada lagu qobaysto afkeeda hore waxaad markaa qiyaastii khaydin kartaa ilaa iyo boqolkiiba 25 oo ku saabsan tamarta biyaha kulul.
- Baddel lingaxa ama cinjirka qasabada markay bilowdo inay da'do ama ay dhibic dhic soo dayso.

3. Mishiinada iska shidan

Mashiino badan oo lagu damiyo rimuutyada waxay ku sugan yihiin xaallad inay iska shidan yihiin markaasna waxay cunaan tamar koronto oo aan loo baahnayn.

- Dami ama bakhtii mashiinada guriga yaalo oo dhan ee leh korontada dabka qaybisa. Markaa ma khasaarinaysid tamar koranto oo aan loo baahnayn.
- Ka saar jaarjerka mobiilka korontada marka aan la isticmaalayn. Xitaa waxaad markaa yaraynaysaa dab kaca ama gubashada oo yaraata!

4. Iftiin ama nal

Nalalka la shito ee aan wax ku oolka ahayn waa laga baxay waxaana jira qaar badan oo fiican, oo lagu bedelayn oo leh tamar koronto wax ku ool ah!

- Isticmaal nalalka la yiraahdo LED haddii ay suurtoagal tahay. Waxay waxtar fiican leeyihiin boqolkiiba 80 marka loo eego nalka la shito.
- Isticmaal kuwa ku haboon in la hoggaamiyo, tusaale ahaan waxa jira qaar marka meesha dad joogo iftiima ama iftiinka maalintii uu xal wanaagsan u noqonayo.

- Ma doonaysaa adigu nalka iftiinkiisa kulul, dooro markaas heerkulka midabka ee 2 700 – 3 000 K. waxaad xitaa ka fikirtaa marka dib loo celinayo, Ra, waa inay ugu yaraan ahaato 80. Warbixintu waxay ku taalaa warqadda nalka la socota.
- Dami ama bakhtii nalka marka aad adigu meesha ka tagto!

5. Weel dhaqid iyo dhar dhaqid

- Waxaad adigu kaydinaysaa tamar koronto haddii aad weelka mishiinka ku dhaqdo marka loo barbardhigo haddii aad weelka gacanta ku dhaqdo - lakiin shuruudu waa in aad weelka biyo qaboow ku dhaqdhaqdid marka aad mishiinka weelka dhaqa isticmaalaysid. Mishiinada cusubi waxay u baahan yihiin subaga weelka ku yaala cunada uun baad ka masaxaysaa. Mishiinka buuxi!
- Dharka waxaad u badnaan ku dhaqaysaa 40 digrii, waxa aad u wsakhaysan ayuunbaa 60 digrii lagu dhaqi karaa. Mishiinka buuxi!
- Raac tallada marwalba oo qiyaas inta saabuunta lagu shubayo ee kartoona ku qoran. Haddii saabuunta lagu badiyo waxay natiijadu noqnaysaa inay xumbo badani samaysanto khatarna ay noqoto in aanay biyo si fiican uga dhiqikarin taasina waxay keeni kartaa in alerji laga qaado. Saabuunta oo yaraata waxay keeni kartaa dharkii oo aan si fiican u dhaqmin.

6. Firinjeer iyo qaboojiye

Firinjeerada iyo qaboojiyeyashu waxay isticmaalaan tamar koronto oo aad u badan maxaayeelay iyagu marwalba way shidan yihiin. Isticmaal badeecadaha tamarta fiican leh ee ay ku qoran tahay. Maanta waxa jira badeecado ay qoran tahay A++ iyo A+++.

- U samee heerkul sax ah; -18 digrii qaboojiyaha iyo qiyaastii +5 digrii firinjeerka.
- Ruufarka ka mari xagga danbe ee firinjeerka iyo qaboojiyahaba muddo markaad joogtaba. Sidaas waxa ku yaraanaya tamarta korontada iyo weliba khatarta in dab kaco ama ay wax gubtaan.
- Xasuusnoow inaad qaboojiyaha barafka ka saartid si joogto ah!



7. Cuno karin

- In in biyaha lagu kululaysto kan biyaha kululeeya wuxuu kuu kaydinayaa tamarta korontada. Haddii aad leedahay foornada ama shoolada wax lagu karsado markaa waxay tamarta korontadu kuu noqonaysaa wax ku ool markaad cuntada karinaysid.
- Hadaad dighiga daboolka saarto waxaad khaydsan kartaa qiyaastii ilaa 30 boqolkiiba marka loo barbardhigo haddii aanad daboolka saarin markaad biyaha kulul karsanaysid.
- Cuntada qaboojiyaha ku jirta haddii la geliyo firinjeerka/talaagada waxay siinaysaa firinjeerka tamar hoose .
- Isticmaal kulaylka shoolada horkeeda, tusaale ahaan waxaad deminaysaa shoolada waxaanad u daynaysaa baradhada inay ku bislaato kulaylka shoolada korkeeda.

8. Kharash koronto

Soo saarka korontada waxay inta badan sababi kartaa waxyeello ka soo gaarta bay'adda iyo cimiladaba. Si firfircooni ku jirto xulasho u samee oo dooro soo-saarka korontada kan tamartiisa la cusboonaynsiin karo. Fiiri heshiiskaaga korontada oo bedello shirkada korontada waxaad hoos u dhigaysaa kharashyadaada korontada iyo dhinaca bay'addaba. Dooro shirkad koronto oo ku Fiican Bay'adda waxaad helaysaa cusboonaysiinta korontada isla markaana gacan wanaagsan ka gaysanaya bay'adda.

9. Bedel sistamka kulaylka

Haddii aa degan tahay guri aad kulaylka ku isticmaashaan saliid ama wax la mid ah waxa wanaagsan in aad ka fekertaan in aad ku bedeshaan wax kale, oo ah wax u wanaagsan bay'adda oo ku saambasan sistamka kulaylka. Waxaad baadhaa adigu inay jirto fursad in aad ku xidhikarto gurigiina kulaylka meesha fog ka yimaada, shidaalka la cusboonaysiin karo ama nooc kale oo ah bamka kulaylka. Inta aanad bedelin, baadh marka hore inay macquul tahay in hoos loo dhigi karo baahida tamarta iyadoo tusaale ahaan la sii adkayn karo daaqadaha/deriishadaha, lingax dheeraad ah lagu xidhikaro ama daaqada/dariishada in la bedelikaro.

10. Gaadiidka

- Dooro markaad gaadhi cusub iibsanaayo gaadhi u fiican bay'adda .haddii si taxader leh loo wado, hawada taayirada oo sax ah iyo gaadhi bay'adda u fiican waxaad shidaalka hoos u dhigi kartaa 20 boqolkiiba.
- Dooro taayir ay A ku qoran tahay tamartu marka aad gadanaayo taayiro cusub. Xasuusnow in aad eegto hawada taayirka ku jirta.
- Baaskiilka kaxayso inta badan! Orodka ugu wanaagsan waxa lagu kaxeeyaa baaskiilka!
- Baabuur wada kaxaysta ama u raac gaadiidka dadka u dhexeeya shaqada! Waxay u fiican tahay oo u wanaagsan tahay bay'adda.